



**BARNAAMIJKA BANAYNTA LUUQYADA EE SEATTLE (CAP)**

Magaalada Seattle waxay iskaashi la samaynaysaa shirkadaha qashinka ururiya ee maxalliga ah iyo macaamiisha magaalada hoose si loo dhimo kaydinta Conteenarada qashinka ee jidadka dadweynaha. Barnaamijka Clear Alleys (CAP) waxaa abuuray Xeerka Agaasimaha SW-406.1 waxaana looga dan leeyahay in la abuuro goobo ganacsi oo nadiif ah, ammaan ah iyadoo la horumarinayo gelitaanka luuqyada. WM waa bixiyaha adeegga CAP ee **fagaaraha Pioneer Square, ee Xaafadda Caalamiga ah iyo xaafadaha Columbia.**



**Sida ay u shaqeyso:** Haddii aanay meheradu lahayn meel bakhaar ah oo loo qoondeeyey ama gaar loo leeyahay, bacaha sida gaarka ah u calaamadsan ayaa loo isticmaalaa qashinka iyo dib u warshadaynta, oo la dhiga luuqyada, waxaana la ururiyaa ugu yaraan laba jeer maalintii.

**Tan macnaheedu waa:** Koonteenarada shirkadaha ee haraga cuntada laguma kaydin karo dariiqyada dadwaynaha ilaa loo ogolaado macaamiisha sido kale dhalooyinka ama qashinka xoolaha ila ka dib markay magaaladu xaqiijiso in aanay jirin meel kale oo lagu kaydin karo goobta. Dhamaan macaamiisha danaynaya inay helaan ka-dhaafitaanka waa inay la xidhiidhaan Solid Waste Compliance & Inspection [SPUClearAlleys@seattle.gov](mailto:SPUClearAlleys@seattle.gov).

**Bilow:** Ka wac WM **1-855-894-9447** si aad u dejiso akoonkaaga oo aad ugu samaysato dalabkaaga ugu horreeya ee bacaha taleefanka. Marka Bacahaagu yimaadaan, u isticmaal sida soo socota...

**1.** Ku rid waxyaabaha dib loo warshadayn karo bacaha saafiga ah. Ku rid qashinka bacaha cawlan.



**2.** Markay buuxsanto, hubi in Bac kasta ay si amaan ah u xidhan tahay oo dhig luuqyada si looga qaado.

**Markaad raacdo tilmaamahan, waxaad ka hortagi doontaa kharashka isticmaalka bacaha aan CAP ahayn, kuwaas oo sharci darro ah.**

**3.** Baakadaha waa in la fidiyaa, la isku duubaa oo lagu dhiga sanduuq ka hor inta aan la dhigin luuqyada si looga qaado.





## Macluumaad ku saabsan Ganacsiga

### CABIRKA BAAKADAHA, QIIMAHA IYO XADKA

**Fiiro gaar ah: Qiimaha wuxuu dhaqan galayaa Abriil 1, 2024.** Kharashka aruurinta Baakadaha iyo raridda USPS ayaa lagu daray khidmadda laakiin macaamiishu waxay bixin karaan kharash dheeraad ah si loo dedejiyo rariddooda marka la codsado.

Baakadaha 15-GAL (30 duubkiiba, xadka miisaanka 20 lbs)	Khidmadda duubkiiba - QASHINKA	Khidmadda duuduubkiiba - DIB U WARSHADAYNTA	Kharashka adeegga bishii:
Macaamiisha ganacsiga	\$174	\$174	<b>Macaamiisha ganacsiga - \$32.45</b>
Macaamiisha deegaanka	\$174	BILAASH*	
Bacaha 33-GAL (15 duubkiiba, xadka miisaanka 40 lbs)	Khidmadda duubkiiba - QASHINKA	Khidmadda duuduubkiiba - DIB U WARSHADAYNTA	<b>Deegaan (qoys badan/aqal) macaamiisha - \$48.25</b>
Macaamiisha ganacsiga	\$123	\$123	* Macaamiisha deegaanka ee dalbada bacaha qashinka waxay heli doonaan tiro u dhiganta oo bacaha dib u warshadaynta ah oo bilaash ah.
Macaamiisha deegaanka	\$123	BILAASH*	

**Qashinka Xad-dhaafka ah:** Qashinka aan lekayn bacda hore loo bixiyay, summada ururinta ayaa diyaar ah alaabta miisaankoodu ka yar yahay 60 rodol oo aan lekayn bacda. Alaabooyinka waaweyn waxaad codsan kartaa ururin gaar ah adiga oo kala xiriiraya WM **1-855-894-9447**.

### DALBASHADA BACAHA HORAY LOO BIXIYAY LACAGTOODA

Si toos ah ula xidhiidh WM **1-855-894-9447** si aad u hesho dalabaadka bacaha, keenista iyo sumada alaabta aadka u badan. Waxa kale oo aad ka dalban kartaa online [wmnorthwest.com/seattle/seattlecaporder](http://wmnorthwest.com/seattle/seattlecaporder)

**Macluumaad ku saabsan sida lacagta loo badbaadiyo adigoo yareynaya qashinka iyo dib u warshadaynta iyo in ka badan,** kala xiriir Barnaamijka Ganacsiga Cagaaran ee [greenbusiness@seattle.gov](mailto:greenbusiness@seattle.gov) ama adigoo wacaya **(206) 343-8505**.

### ADEEGGA QASHINKA CUNTADA IYO DAYRKA

**Dhamaan meheradaha ganacsi ee leh qashinka cuntada ama warqadaha la burburin karo waxa looga baahan yahay inay iska diiwaan galiyaan adeega qashinka deyrka, ku ururiyaan wasakhda cuntadooda goobta, ama ay iskood ugu raraan wasakhda cuntada xarun lagu wareejiyo si loogu farsameeyo.** Qiimuhu waxay ku xiran yihiin nooca iyo cabbirka Tanaga, inta jeer ee soo qaadista, iyo haddii walxuhu isku cufan yihiin. Wac WM at **1-855-894-9447** si aad isu diiwaan geliso oo aad wax badan uga ogaato cabbirka adeegga iyo inta jeer ee la bixiyo.

### ILAHA LUUQADDA

- Adeegyada tarjumaada fadlan wac **(206) 580-8299**
- 如需要口譯服務，請撥電話號碼 (206) 580-8299
- 통역 서비스를 원하시면 (206) 580-8299 으로 전화하세요
- Wixii turjubaan afka ah ku saabsan, Fadlan la soo xariir taleefoonka (206) 580-8299
- Para servicios de interpretación por favor llame al (206) 580-8299
- Para sa serbisyo ng tagapagpaliwanag, tumawag sa (206) 580-8299

**Suaalaha?** Booqo [seattle.gov/utilities/protecting-our-environment/seattle-clean-city/clear-alleys](http://seattle.gov/utilities/protecting-our-environment/seattle-clean-city/clear-alleys)